**AMARKA lamb. 17**

**Tirakoobka guud ee dadweynaha iyo hawlaha dhaqaalaha**

## MAAMULKA WALAAYADDA TALYAANIGA EE SOMALIYA

## MAAMULAHA GUUD

Kadib markii la arkay sharciga 4 Nofember 1951 lamb. 1301 oo ansixiyey Heshiiska Maamulida Dhulka Somaliya ee dalka Talyaaniga kaas oo siiyey awood buuxda ee fulineed.

Kadib markii la tixgeliyey baahida in la kala qeybiyo dadka ku nool dadka, dhaqamadooda ee la xiriira howlahooda dhaqaale.

Kadib markii la dhegeystay talada Golaha Latalinta ee Qaramada Madoobe.

Kadib markii la dhegeystay aragtida Guddonka Dalka.

### WUXUU AMRAYAA

### Qod. 1

Kadib markii lagu carifo dekreetoyinka loogu tala galay:

— Tirakoobka guud ee dadweynaha;
— Tirakoobka howlaha warshadeynta iyo ganacsiga;
— Howlaha guryeenta.

### Qod. 2

Xafiiska Maamulka wuxuu kale oo amri kara in baritaan dheerad ah ee dhinaca tirakooka si loo hirgeliyo tiraakoobka ama la ogaado dhinacyad dhaqaalaha, dhaqanka ee ka jira dalka iyadoo loo baahan wax sharci ah.

### Qod. 3

Deeganadda, dowladaha hoose iyo goobaha kale waxaa la geeyn doona tirakood guud ee dadweynaha, oo caddeyn doona dadka ku xadiir ku ah amase ku nool:

a) Tirada qoysaska tirada qabaailadda, dadka wada nool iyo habka ay ku wada nool yihiin;

b) Jinsiga, taarikhda dhalashada, ama waqtiga tilmaamaya, da'ada ,goobta uu qofku u dhashay, rugta uu ku nool yahay si rasmi ah iyo midda oo mar mar ku nool yahay, inuu xaadir ku yahay goobahasi ama uu ka maqan yahay muddada tirakoobka, muwaadininta ajaanibka ah;

c) Meheraddi kowaad iyo midda labaad , farshaxanka ama shaqada gaar ah, luqadaha lagu hadlo ama la qoro;

d) Goobaha ay suurto gal tahay waxaa la tirakooki doona haddii ay surto gal tahay arrimaha la xirira dhalmada, da'da dhalmada, geerida gaar ahaan geerida ilmaha saqiir ka ah, tira guurka faraha badan, qaabka ay qoysyadu u deggen yihin, guryahooda iyo adeegyada ay haystaan.

### Qod. 4

Tirakoodka warshadaha iyo ganacsiga oo la xiriira xaladaha goobta iyo nocyada kale duwan ee howlaha ganasiga, wuxuu lagu muujyey qodobka, sare ku xusan.

Tirada shirkada, dhismooyinka, warshadaha suufka, sheybareyaalka xatta kuwa ay dowladuu maamulaan iyo rugaha farshaxanadda, dukaamada dowladeed ama

si shakhsi loo leeyahay, xatta haddii aysan markaas shaqeynin, shirkadaha gaadidka, kuwa deymaha bixiya, kuwa caymiiska, adeegyada isgaarsiinta iyo adeegyada guud.

Meheradasii oo dhan waxaa la eegi doono nooca qeynuunka ay ku siifoobeen, tirada shaqaalaha markii loo eego jinsiga, da'da, muwadinimada, khibradaha, biyo-qiiq kululeeyaasha, dab dhaliyee, motoorada nooca kowaad iyo kuwa labaad, gaadiidyada kala duwan, tirada iyo tayada agabsyada warshadaha soo saran iyo agabka laga helo goobaha, mushaarka la bixiyo iyo beecgeynta.

**Qod. 5**

Maclumaadka la xiriira tirakoobkaan waxaa lagu soo ururi doona qaab qoraal oo su'aaladu la xiriira kuwxii lagu tilmaamay xeerka loogu tala galay. Su'aallaha la xirira tirakoobka dadka waxaa lagu qaadi doonaa warqado laba nuqul ah kuwaas mid la siin doono Dowladaha Hoose ama dib u eegida keyka tirakoobka dadweyaha

**Qod. 6**

Guddi dhexa ayaa loo xilsaari doona kormeerka howlaha tirakoobka.
Waxaa howlaha tiraakoobka toos u maareyn doona Xafiiska gaarka ee tirakoobka oo ka kooban Xafiiska Adeega Tirakoobka oo ka mid noqday.

Fulinta howlaha tirakoobka ah waxaa ka fulin doono Xafiisyada tirakoobka ee deeganada iyo dowladaha Hoose.

**Qod. 7**

Deegan kasto, degmo kasta ama dowlad hoose kasta waxay yeelan doonot Guddi kormeere ah oo ay mas'uul ka yihiin Guddomiyaha , Madaxa Maamulka dowladaha hoose ama cid ka mas'uul ah oo leh karti in uu fulin karo howlaha loo igmaday.

**Qod. 8**

Madaxa qoysaska iyo madaxa bulshada, hantileeyasha, maal geliyeyaashu, kuwa gaadidleyda ah, madaxda shirkadaha ama cidii u xilsaaran oo aanan ka soo jawaabin su'aalaha la weydiney ama macluumad bar ama qalad bixiyey waxay muteysan doonaan ganax dhan ilaa So 200, ganaaxa waxaa lagu kordhin doona ilaa So. 2000 (laba kun) haddii aysan ka soo jawaabin codsiga ka qeyb galka tirakoobka.

**Qod. 9**

Maclumaadka lagu soo aruuriyey tirakoobkii waa mid qarsoodi ah mana loo gudbin karo dad shaqsi ama xubnaha dowladda oo aan ka ahayn qaab aad u gaaban oo aan lagu tilmaameynin qof shaqsi ah.

Ciddi ku howlan soo uruuriinta maclumaadkan tirakoobka oo aan xafidin maclumaadkasi si kuu farayo qodobka sare ku xusan wuxuu muteysan doona ganaxa ilaa So 200 haddii uu uusan gaarsisneyn fal dembiyeed dku tilmaaman Xeerka Ciqaabta.

**Qod. 10**

Isgaarsiinta bostada ee la xiriira warqadaha tirakooba oo xubnaha ay dhexdooda isugu diraan waa mid lacag la'aan ah.

**Qod. 11**

Beeraleyda doonaya in dhaqaale toos galaan, abuurka suufka waxaa looga gedi doona degmooyinka ama shirkadha, hehy'adaha gaarka loo leeyahay oo qaabilsan howlahaas sida ku cad qod. 5.

Beeraleydaasi waa in ku jaan gooyaan bahidooda codsiga abuurka suufa tirada ay uga baahan yihin in ay beeraan.

Ciddi ka ganacsaneysa abuurka suufka waa in ay ku soo bandhigtaa xafiiska Deegaanka liiska dadkii ka gatay, tirada abuurka ay gateen iyo goobta lagu beeri doono. Liiskaasi waa mid u furan dadweynaha ciddii doneysa.

**Qod. 12**

Si loo fuliyo howlaha ballaran ee tirakoobka, iyo muddada la doonaya in lagu dhameeystiro, waxaa xafiisyada Maamulka Walaayada, kuwa dowladaha Hoose iyo Hey'adaha kale ee dowliga ah waa in si toos ula shaqeeyaha Xafiiska gaar ka ee tirakoobka.

Xafiiska gaarka u tirakoobka wuxuu haddi loo bahdo isctimaali kara shaqaale ka baxsan maamulka.

Dhaqaalaha iyo mushaaradaha shaqaalaha qeybta tirakoobka waxaa lagu maamuli doonaa dekreeto ka soo baxay Maamulaha Guud.

**Qod. 13**

Kharajka khuseeya amaradda ku qoran halkaan waxaa lagu xusay qof. 117 ee misaaniyada  Somaliya, sanadkaan socda iyo qeybaha sare.

**Qod. 14**

Maamulaha Guud wuxuu dekreeto ku soo carifi doona nimadaminta habraaca fulinta amar-sharciyeedkaan.

Muqdisho, 30 Oktober 1952.

Maamulaha

**Fornari**

Waxaa la arkay oo la diiwangeliyey lamb. 883 ee Keydka Dekreetoyinka

5, Nofeember 1952.